

Ikhtiyaarada daaweynta caafimaadka dabeecadda ee dhallinta dhowr-iyo-toban-jirka ah

MAGACA BUKAANKA

LAMBARKA DIIWAANKA CAAFIMAADKA

Waalidiinta ama mas'uuliyiinta raadinaya daaweynta ama qiimeynta xannuunka caafimaadka dhimirka ama xannuunka isticmaalka maandooriyaha ee loogu talagalay dhallinta dhowr-iyo-toban-jirka ah ee da'doodu u dhaxeeyso 13 ilaa 17 sano waa in lagu wargeliyaa dhammaan ikhtiyaarrada daaweyn ee sida sharci ahaanta ah loo heli karo. Kuwan waxaa ka mid ah Daaweynta uu Bilaabay-Dhowr-iyo-toban-jirka (horey loo oran jiray daaweynta uu bilaabay-dhallaanka), Daaweynta uu Bilaabay-Qoyska (horey loo oran jiray daaweynta uu bilaabay-waalidka), iyo Cusbital-dhigista Khasabka ah ee qofka madaxa looga jiro. Laga soo bilaabo bisha Luulyo 2019, HB 1874 ayaa ballaarinaya helidda daaweynta caafimaadka dabeecadda (BH) ee dhallinta dhowr-iyo-toban-jirka ah, isaga oo u ballaarinaya luuqadda Daaweynta uu Bilaabay Qoyska (FIT) si waafaqsan [RCW 71.34](#) si uu ugu daro dhabbetusayaasha iyo adeegyada daaweynta bukaan-socodka ee ku saabsan macluumaadka loo sheegi karo waalidka, mas'uulka. ama bixiyaha adeegga caafimaadka dabeecadda iyada oo aan oggolaansho laga helin dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah.

Daaweynta uu Bilaabay-Dhowr-iyo-toban-jirka (RCW 71.34.500-530)

Dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka, ay da'diisu u dhaxeeyso 13 ilaa 17 sano, ayaa wuxuu codsan karaa qiimeynta loogu talagalay daaweynta xannuunka caafimaadka dhimirka ee bukaan-socodka ama bukaan-jiifka ama daaweynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha iyada oo aan waalidka oggolaan. Haddii xaruntu ay oggolaato in loo baahan yahay daaweynta xannuunka caafimaadka dhimirka ee bukaan-socodka ama isticmaalka maandooriyaha, dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ayaa adeegyada la siin karaa. Waa in bukaan-jiifinta la oggolaado kaliya haddii qofka xirfadlaha ah ee ka mas'uulka ah xarunta uu oggolaado in loo baahan yahay daaweynta bukaan-jiifka. Dhallaanka ay da'diisu ka yar 13, midkood idanka waalid ama idan ka yimid mas'uul la aqbalay ayaa loo baahan yahay oo loogu talagalay daaweynta bukaan-jiifka.

Daaweynta uu Bilaabay-Qoyska (RCW 71.34.600-670)

Waalidka, mas'uulka, adeerka ama eeddada, daryeelaha qaraabada ah, qofka kale ee xigtada ah ama shakhsiga idman ayaa waxay keeni karaan dhallaankooda dhowr-iyo-toban-jirka ee da'diisu u dhaxeeyso 13 ilaa 17 sano jir cusbitaal, xarunta bukaan-jiif ama xarun kasta oo lagu daaweeyo ama lagu qiimeeyo xannuunka caafimaadka dhimirka ama barnaamijka daaweynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha (SUD) ee la oggol yahay waxayna codsan karaan in qiimeynta xannuunka caafimaadka dhimirka ama qiimeynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha uu ku sameeyo qof xirfadle ah si loo go'aamiyo haddii dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah uu qabo xannuunka caafimaadka dhimirka ama xannuunka isticmaalka maandooriyaha iyo in uu u baahan yahay daaweyn bukaan-jiif ama bukaan-socod. Qiimeynta lagu sameeyo goobaha bukaan-jiifka 72 saacadood ka badan ma qaadan karto. Oggolaanshaha dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah looguma baahna midkood qiimeynta xannuunka caafimaadka dhimirka bukaan-socodka ama bukaan-jiifka ama xannuunka isticmaalka maandooriyaha. *Fadlan eeg qeexidda cusub ee waalidka RCW 71.34.020(25)(a).*


Fadlan ogow: *Ma jiro bixiye ay ku waajibto in uu daaweyn u fidiyo dhallaan dhowr-iyo-toban-jir ah iyada oo la raacayo qoddobada Daaweynta Uu Bilaabay-Qoyska (FIT). Si kastaba, diidmada dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah in uu oggolaado daaweynta waa in aysan noqon sababta kaliya ee lagu saleeyay go'aanka xarunta ay ku diidayso adeegyada.*

Daaweynta Buukaan-socodka Gaarka ah iyo Tan Buukaan-socodka ee Uu Bilaabay-Qoyska

Haddii uu go'aamiyo qofka xirfadlaha ah in dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah ee da'diisu u dhaxeeyso 13 ilaa 17 uu qabo xannuunka caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaha, una baahan yahay daaweynta bukaan-socodka, adeegyo ayaa loo fidin karaa dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah iyada oo loo marayo FIT. Daaweynta Uu Bilaabay-Qoyska (FIT) wuxuu tilmaamayaa in waalidka uu heli karo iyo in uu oggolaan karo ilaa 12 kullanaada caafimaadka dhimirka ee bukaan-socodka ah iyo/ama SUD ee loogu talagalay dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah oo lala yeelanayo qof xirfadle gaar ah mudd 3 bilood gudahooda ah. Xirfadlaha bukaan-socodka ee bixinaya adeegyada waa in uu ogeysiisayaa dib-u-eegaha qandaraaska kula jira Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) in dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah uu bilaabay qaadashada daaweynta bukaan-socodka 24 saacadood ee ugu horreeya gudahooda ee adeegyada bilowga ee hoostagaya Daaweynta Uu Bilaabay-Qoyska, iyo mar kale 45 maalmood kasta inta lagu guda jirto muddada saddexda bilood oo dhan. Ka-dib muddada daaweynta, dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah waa in uu bixiyaa oggolaanshaha daaweynta dheeraadka ah ee isla bixiyaha adeegga bukaan-socodka.

Daaweynta Buukaan-jiifka ee Uu Bilaabay-Qoyska

Haddii uu go'aamiyo qofka xirfadlaha ah in dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah ee da'diisu u dhaxeeyso 13-17 in uu qabo xannuunka caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaha oo ayna jirto baahi caafimaad oo loo qabo daaweynta bukaan-jiif, waalidka ama mas'uulka waxaa ay codsan karaan in dhallaanka dhowr-iyo-toban-jirka ah in la hayo si loo daaweeyo. Haddii barnaamijka bukaan-jiifka



uu aaminsan yahay in dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah in uu u baahan yahay la hayo si loo daaweeyo, xarunta bukaan-jiifka daaweynta waa in ay ku wargelisa dib-u-eegaha qandaraaska kula jira HCA in dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah in xarunta loo dhigay daaweyn waafaqsan Daaweynta Uu Bilaabay-Qoyska 24 saacadood gudahooda ka-dib marka la buuxiyo qiimeynta. Haddii barnaamijka bukaan-jiifka uu aaminsan yahay in dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah ay tahay in la hayo in ka badan 7 maalmood, barnaamijka bukaan-jiifka waa in uu ku wargeliyaa HCA in dib-u-eegista baahida loo qabo in la sii wado daaweynta bukaan-jiifka loo baahan yahay in la buuxiyo. Dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah waa in ay xaruntu ku wargeliso xaqa isaga ama iyada ay u leeyihiin in ay ka codsadaan Maxkamadda Sare in laga sii daayo xarunta muddo aan ka yareyn shan maalmood ka-dib dib-u-eegista. Dhallaan kasta oo dhowr-iyto-ban jir ah oo daaweyn u qaadanaya si waafaqsan cutubkan waa in laga sii daayo xarunta bukaan-jiifka 30 maalmood gudahooda laga soo bilaabo maalinta dib-u-eegista uu ku sameeyo dib-u-eegaha qandaraaska kula jira HCA haddii dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah uu u galey si iskiisa ah ama qof xirfadle ah ama Qofka Loo Xilsaaray in uu Xaaladda Wax-ka-qabto (DCR) uu bilaabo tallaabada sharciga ah ee cusbitaal-dhigista khasabka ah ee waafaqsan qaybtan.

Haddii dib-u-eegista uu ku sameeyo dib-u-eegaha qandaraaska kula jira HCA ay go'aamiso in dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah uusan ka soo bixin shuruudaha daaweynta bukaan-jiifka, waalidka ama mas'uulka waa in si degdeg ah loogu wargeliyaa dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ahna waa lagu soo daayaa 24 saacadood gudahooda. Xaaladani, haddii waalidka ama mas'uulka iyo xarunta labaduba ay aaminaan in caafimaad ahaan ay daruuri tahay dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah in uu ku sii jiro daaweynta bukaan-jiifka, xaruntu waxaa ay hayn doontaa dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah ilaa maalinta sharciga maxkamadda labaad ee ku xigta dib-u-eegista HCA. Tani waxaa ay u oggolaan doontaa waalidka ama mas'uulka waqti uu ku soo xareeyo codsiga dhallaan halis ku jira iyada oo la raacayo **xeerka RCW 13.32A.191**. Adeegyada Dib-u-heshiisiinta Qoyska (**RCW 13.32A.040**) ayaa sidoo kale la bixin kara iyada oo la marayo Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF).

Dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah ee loo dhigay xarunta bukaan-jiifka si waafaqsan Daaweynta Uu Bilaabay Qoyska waa in isla markiiba laga soo daayaa xarunta ka-dib marka la helo codsiga qoraalka ah ee waalidka.

Daaweynta Khasabka ah (RCW 71.34.700-795)

Dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah ee ay da'doodu tahay 13 sano jir ama ka weyn ee soo bandhiga suurtagalnimada in uu dhaawac halis ah u geysto naftiisa ama dadka kale, kaas oo si dhab ah naafo u noqday oo laga yaabo in uu u baahan yahay daaweynta caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaha ee bukaan-jiifka oo dhallaankuna uu diido in uu oggolaado gelidda iskiisa ah, dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah waxaa la hayn karaa ilaa 12 saacadood si loogu suurtageliyo Qofka loo Xilsaaray in uu Xaaladda Wax-ka-qabto (DCR) in uu u qiimeeyo dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah cusbitaal-dhigista khasabka ah oo suuragal ah. Haddii aan la heli karin habab daaweyn iskaa ah ama yara xaddidan oo beddelaad ah, oo DCR-ga uu go'aamiyo in dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah uu soo bandhigayo suurtagalnimada dhaawac halis ah ama uu si dhab ah naafo u yahay, iyada oo sababtu ay tahay xannuun caafimaadka dhimirka ah ama isticmaal maandooriye, dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah waxaa laga yaabaa in lagu hayo xarunta. Dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah waxaa keliya lagu waajibin karaa cusbitaal-dhigista khasabka ah ee daaweynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha haddii xarun maareynta joojinta isticmaalka maandooriyaha iyo xasillinta ammaanka ah ama barnaamijka daaweynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha ee la oggolaaday la heli karo oo ayna dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah u hayaan boos ku filan.

Haddii dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah horay loo dhigay xarunta daaweynta caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiifka ama isticmaalka maandooriyaha, waxaa laga yaabaa in ay arkaan xirfadlaha xanuunka caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaha iyo shaqaalaha caafimaadka 24 saacadood gudahooda si loo go'aamiyo haddii la raadinayo tallaabo sharciga ah ee maxkamadda ee cusbitaal dhigista khasabka ah. Sida uu qabo xeerka daaweynta khasabka ah, dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah waxaa marka hore daaweynta loo hayn karaa ilaa 72 saacadood, oo aan ku jirin maalmaha fasaxa toddobaadka iyo fasaxyada. Inta lagu guda jiro waqtigan, xarunta waxaa ay maxkamadda ka codsan kartaa in dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah la sii hayo 14 maalmood oo dheeraad ah, haddii la aaminsan yahay in daaweyn dheeraad ah loo baahan yahay. Dhammmaadka 14-ka maalmood, xarunta waxaa ay soo gudbin kartaa codsi gaaraya ilaa 180 maalmood dheeraad ah oo daaweynta bukaan-jiif ah.

Haddii DCR-ka uusan hayn dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah, waalidka ama mas'uulka wuxuu raadin karaa in dib-u-eegis lagu sameeyo go'aanka, iyada oo la raacayo xeerka 71.05.201, isaga oo ogeysiis u gudbinaya maxkamadda oo bixinaya nuqul ah warbixinta iyo/ama qoraallada DCR-ka.

Haddii dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah si shuruudo ku xiran cusbitaalka looga soo saaro ama amar maxkamadeed beddel ah oo yara xaddidan, oo uusan raacayn shuruudaha sii deyntaasi ama amarka maxkamadda, ama shaqeyntooda ay si weyn u sii xumaatay, dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah waxaa qiimeyn kara oo hayn kara DCR ka-dibna waxaa loo qaadayaa xarunta qiimeynta iyo daaweynta bukaan-jiifka ee loogu talagalay daaweynta caafimaadka dhimirka ama xarun maareynta joojinta isticmaalka maandooriyaha iyo xasillinta ammaanka ah ama barnaamijka daaweynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha, haddii xarun la heli karo oo ayna dhallaanka dhowr-iyto-ban jirka ah u hayaan boos ku filan daaweynta xannuunka isticmaalka maandooriyaha. Haddaad u baahan tahay caawimo dheeraad ah ama aad su'aalo qabto, wac khadka dhibaataada caafimaadka dabeecadda ee degaankaaga.

Ogeysiiska Dib-u-eegista Khasabka ah ee Adeeg Bixiyeyaasha

24 saacadood gudahooda ka-dib dhigista FIT adeeg bixiyaha waa in uu ogeysiiyaa dib-u-eegaha qandaraaska kula jira HCA, Xafiiska Maamulka FIT, isaga oo u marsiinaya iimaylkan ee ammaanka ah fitreporting@fitadministration.com ama ugu diraya fakiskan ammaanka ah 206-859-6432

Ogeysiiska waa in ay ku qoran yihiin:

- Magaca iyo Taariikhda Dhallashada
- Taariikhda dhigista FIT ama ay xaaladdu isku beddeshay FIT
- Degmada uu dhallaanka dhowr-iyto-toban jirka ah ku nool yahay, iyo
- Nooca caymiska

Inta u dhaxeyso 7 – 14 maalmood ee marka dhallaanka dhowr-iyto-toban jirka ah la dhigo xarunta, iyo 45 maalmood kasta ee ay socota daaweynta bukaan-jiifka ama bukaan-jiifka gaarka ah, adeeg bixiyaha waa in uu macluumaadkan soo socda u soo diraa qandaraaslaha HCA si uu dib-u-eegis ugu sameeyo in caafimaadka loo baahan yahay:

- Warqadda sida dhaqsiyaha badan looga helo macluumaadka dhigista
- Qoraalka u-kuurgelidda qaadashada
- Warbixinta ka-bixinta xarunta oo kooban

Waxaa la i siiyay ogeysiis qoraal ama hadal ahaan ah ee ikhtiyaaraadka daaweynta la heli karo ee loogu talagalay dhallaanka dhowr-iyto-toban jirka ah.

Saxiixa waalidka/mas'uulka

Taariikhda

Saxiixa wakiilka xarunta

Taariikhda

Aan la awoodin in la helo saxiixa ama caddeynta waalidka/mas'uulka.

Sababta saxiix la'aanta:

Saxiixa wakiilka xarunta

Taariikhda

Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Daaweynta uu Bilaabay-Qoyska, fadlan la xiriir:

HCAFamilyInitiatedTreatment@hca.wa.gov

Cusboonaysiinta

17-ka Maarso, 2020

- Xiriirka la beddelay ee qirashooyinka iyo dib-u-eegisyada ku soo dir:
Xafiiska Maamulka FIT, iyadoo loo soo marsiinayo iimaylkan ee ammaanka ah fitreporting@fitadministration.com or via secure fax at 206-859-6432.